



Warqadda Xaqiiqada Dacwadihii-hore

Disembar 15, 2012, waxaa la bedelay habka lagu go'aaminayo dacwadaha magangleyada qaxootiga laga sameeyey Kanada gudaheeda si loogu daro xaddidaad waqti sharciyeysan oo cusub si loogu qabto dhamaan dhegeysiyada dacwadaha cusub (30, 45, iyo 60 maalmood). Waqtigaas, waxaa jiray ku dhawaad 32,000 dacwadood – oo ah waxa Guddoonka Socdaalka iyo Qaxootiga (IRB) ugu yeero “dacwadihii hore (legacy claims)” – kuwaasoo ku jira liiska sugitaanka ee ka yimi hanaankii hore, oo waqti loo qabanayey sida awooddu u ogolaato.

Guddoonka wuu fahamsan yahay dhibka daahidda habka waditaanka u keenayo dadka dacwoonaya iyo goysaskooda. Sababtaas darteed, Abriil 2017, Guddoonka IRB wuxuu ku dhawaaqay sameynta Xoog Shaqo ee Dacwadihii-hore (Xoog Shaqo) (Legacy Task Force (Task Force), si ka hor May 1, 2019 loo galo dhamaan kiisaska dacwadihii hore ee haray. Xoogga Shaqo wuxuu bilaabay shaqadiisa May 8, 2017.

Juun 20, 2017, IRB waxay soo saartay [war murtiyeed](#) iyo [fiidyow YouTube](#) oo aay ku weydiinayaan dadka dacwadihii hore leh in aay la xiriiraan IRB si waqti loogu qabto dhegeysigooda iyo in aay xogtoodii ugu dambaysay ku soo gudbiyaan Foomka Doonitaanka Wadidda-dacwadda ([Intention to Proceed Form](#)) sidii loogu baahdo.

Xoogga Shaqo waxay bilaabeen dhegeysashada kiisaska Sitembar 18, 2017, Nufeembar 30, 2017 waxaa harsanaa 4,444 kiis oo dacwadihii hore ah in la dhameystiro. Kiisaskan harsan, in ka badan 200 waa la go'aamiyey waxaana lagu jiraa in boostada loogu diro dadka dacwoonaya, 979 dacwadoodna waqtiga xaadirka ah jadwalka dhegeysiga inta u dhaxeysa Disembar iyo May 2018 ayeey ku jiraan, iyadoo kuwa dheeraad ah si joogto ah loogu darayo. Kiisaska kale ee dacwadihii hore ee haray waxaa la dhegeysan doonaa oo loo soo gabagabeyn doonaa sida ugu dhaqsiiyaha badan.

Xoogga Shaqada wuxuu weydiisanayaa dhamaan dadka dacwoonaya ee aanan la soo xiriirin IRB si waqti loogu qabto dhegeysigooda sida ugu dhaqsiiyaha badan si dacwaddaada loo soo gabagabeeyo.

Wareegyada Ready Tours oo loogu talagalay Qaxootiga Dadka-weydiisanaya

IRB waxay wadashaqeyn la sameysay ururada aan-dowliga ahayn (NGOs) oo dhowr ah si aay uga caawiyaan dadka qaxootiga weydiistay in aay isu diyaariyaan dhegeysiyadooda soo socda iyagoo maraya Ready Tours. Wareegyada waa lacag la'aan waxaana lagu qabanayaa xafiisyadeena Vancouver, Toronto iyo Montreal. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan la xiriir NGO-ga gobolkaaga ka qabanqaabinaya Ready Tours.

Macluumaad Dheeraad ah

IRBCISR-1570163174-86



- Dadka dacwadihii hore leh waa in aay macluumaadkooda ugu dambeeyey ku soo diraan Foomka Doonitaanka Waditaanka-dacwadda sida loogu baahdo.
- Dadka dacwadihii hore leh waxay sii isticmaalayaan Foomka Macluumaadka Shaqsiga (PIF)
- Waa in aad dib-u-fiirisaa macluumaadka ku jira [Xirmada Dukumentiyada Waddanka](#) ee dacwaddaada la xiriira.
- Waa in aad mar walba ogaataa waxa aad u baahan tahay in aad sameeyso ee IRB la xiriira, taasoo aay ku jirto in aad tagto dhegeysi si aad u sharaxdo xaaladdaada sheekadaadana u sheegto. Go'aan-gaare IRB ayaa go'aamin doona haddii aay tahay in lagu siiyo sharci qaxooti iyo in kale.
- Waxaad xaq u leedahay in qareen uu wakiil kuu noqdo dhegeysigaaga adigoo kharashka iska bixinaya. Laakiin, gobolo badan waxay bixiyaan adeegyo kaalmo sharci. Waxaa ku jiri kara tan siinta macluumaad, talo, kaalmo sharci iyo wakiilnimo loogu talagalay dadka dacwoonaya ee xaqa u leh. Wixii ah macluumaad tafatiran ee adeegyada iyo xaq-u-lahaanshaha ah, fadlan la xiriir [hey'adda bixisa kaalmada sharciga](#) ee gobolkaaga.
- Dadka dacwadihii-hore leh ee leh su'aalo dheeraad ah waa in aay kala xiriiraan Xafiiska Dacwadihii-hore 1-833-534-2292.